Iskuulka Bulsho ee UP Academy Boston waxa lagu sameeynayaa dib u cusboonaysin

Caawimadaada ayaa loo baahan yahay!

Ujeeddada dukumintiga ayaa ah in la bixiyo macluumaad muhiim ah oo ku saabsan mustaqbalka UP Academy Boston iyo dib u cusbooneysiinta iskuulkeeda bulsho. Dukumentigan, waxaad ka heli doontaa soo koobid buuxda ee nidaamka dib u cusboonaysiinta iyo saameynta ay ku leedahay UP Academy Boston iyo sidoo kale siyaabaha adiga iyo qoyskaaguba aad u taageeri kartaan.

Taariikh kooban oo ku saabsan dugsiyada Charter:

- Iskuulada Charter waxaa la sameeyay 1993 ka dib markii loo cuskaday Xeerka Dib-u-habeeynta Barbaarinta 'Commonwealth of Mass Education Reform' waxaana loo arkaa iskuulo dowladeed oo madaxbanaan oo ka hoos shaqeeya jaartarka shanta sano ah ee ay bixiyeen Golaha Dhexe ee Dugsiga Hoose iyo Sare.

- Dib-u-cusboonaysiinta ayaa ah aalad ay adeegsato Waaxda Tacliinta Dugsiga Hoose iyo Dugsiga Sare si loo hubiyo in dugsiyada Charter ay sifiican u shaqeynayaan oo ay ka soo baxaan heerarkii lagu qeexay heshiiska Axdiga.
    - 5tii sanoba, iskuullada charter waa inay cusboonaysiiyaan jaartarka iyada oo loo marayo geedi socod ballaaran oo ay ka mid tahay sameynta iyo soo bandhigida arjiga, booqashada goobta, iyo tan ugu muhiimsan, marag ka timid waalidiinta.
    - Cusboonaysiinta waxaa lagu go'aamiyaa isku darka codad marka hore guddiga iskuulada Dadweynaha Boston ka dibna guddiga waxbarashada iyadoo loo marayo Waaxda tacliinta ee Dugsiga Hoose iyo Sare.
    - Sanadka soo socda (2020/21) waa sanadkii ugu dambeeyay ee heshiiska axdiga hadda jira

Saamaynta UAB:

- Cusboonaysiinta axdiga quseeya iskuulka bulshad lama dammaanad qaadi karo
- Gudiga waxbarashadu waxay gaarayaan go'aanka kama dambeysta ah ee ah in iskuulka bulshada shaqaynaya la cusbooneysiisto iyo in kale
- Haddii jaartarka aan la cusbooneysiin, dugsiga waa la xiri karaa!

Ku lug lahaanshaha waalidiinta iyo xubnaha qoyska waxay qayb muhiim ah ka noqon doontaa ka caawinta Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Boston iyo ugu dambeyntii Guddiga Waxbarashada inay go'aan ka gaaraan dib u cusboonaysiinta iskuulka bulshada.

Bogga xiga, waxaad ka heli doontaa liis faahfaahsan oo ah siyaabaha aad u taageeri karto nidaamka dib u cusboonaysiinta si aad u hubiso in UP Academy Boston iyo shaqaalaheeda ay sii wadi karaan siinta carruurtaada tacliinta ay u qalmaan!

Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad ku taageerto mid ama ka badan dariiqooyinka lagu qeexay!

Eeg dhinaca kale >>>>>>>>>>

SIDAD U CAAWIN KARTO

Waraaqaha / Fiidiyeyaasha: Waxaan ka aruurineynaa qoysaska waraaqo iyo fiidiyowyo badan intii suurto gal ah si aan u gaarsiino guddiga iskuulka si aan u taageerno dib u cusbooneysiinta howlgalka iskuulka bulshada. Fadlan hoos ka fiiri tilmaamaha qoraalka iyo duubista fiidiyaha. Dhammaan waraaqaha iyo fiidyowyada waa in lagu hagaajiyaa mid ka mid ah waxyaabaha soo socda: Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Boston AMA Michael Loconto, Guddoomiyaha Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Boston ee ku yaal 2300 Washington Street, Boston, MA 02119.

Fadlan u gudbi dhammaan waraaqaha iyo fiidiyaha Adkeem Jackson, Sr, Agaasimaha Ka Qaybgalka Qoyska iyo Xiriirka Dibedda at ajackson@upeducationnetwork.org. Fadlan soo gudbi waraaqahaaga iyo fiidiyowyadaaga sida ugu dhaqsaha badan. Waan kaaga mahadcelineynaa taageeradaada!

Imaanshaha ama ka hadalka inta lagu gudo jiro kulanka guddiga iskuulka: Xiritaanka iskuulka hada, waxaan sugeynaa macluumaad kusaabsan jadwalka kulanka guddiga iskuulka. Faahfaahin dheeraad ah ayaan soo gudbin doonaa toddobaadyada soo socda. Haddii aad xiisaynayso ka qaybgalka ama ka hadalka inta lagu jiro kulanka guddiga dugsiga, fadlan email u soo dir Adkeem Jackson, Sr, Agaasimaha Ka Qaybgalka Qoyska iyo Xiriirka Dibedda ee ajackson@upeducationnetwork.org.

Wac guddiga dugsiga: Waalidka iyo xubnaha qoyska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay la xiriiraan Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Boston ee 617-635-9014 oo ay u dhigaan fariin taageeraysa cusboonaysiinta UP Academy Boston. Markaad waceyso, waxaad dhihi kartaa, "Waxaan ku soo wacayaa inaan codsado codayntada anigoo ku hadlaya magaca UP Academy Boston ee Charter Renewal."

Email-ka Guddoomiyaha Guddiga Iskuulka: Waalidka iyo xubnaha qoyska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay email u diraan Guddoomiyaha Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Boston si ay uga codsadaan taageeradiisa. Hadaad email u direyso, hubi inaad sheegto inaad dalbaneyso codkiisa iyo taageerida aad u jeceshahay in UP Academy Boston ay cusbooneysiiso xeerka iskuulka bulshada. Gudoomiyaha, Michael Loconto, waxa email looga diri karaa mloconto@bostonpublicschools.org.

TALOOYIN KU SAABSAN QORIDA, WICIDA, FIIDYOW SAMAYNTA

Caddee bilowga fariintaada sababta aad u soo xiriireyso

- Waxaad qoreysaa ama ka hadlaysaa taageerada cusboonaysiinta UAB Charter
- Waxaad si qaas ah u weydiisaneysaa Guddiga Dugsiyada Dadweynaha Boston inay u codeeyaan iyagoo u oggolaanaya Guddiga Tacliinta in ay oggolaadan cusboonaysiinta heshiiska charter ee UP Academy Boston

Waxyaabaha la iftiiminayo

- Tusaalooyinka sida dhigashad UAB ay ugu fiicneyd cunuggaaga ugana faa'iideystay waxbarashadooda iyo horumarkooda
- Tusaalooyinka sida dugsigu saameyn toos ah ugu yeeshay qoyskaaga
- Sheekooyin gaar ah oo ku saabsan saamaynta togan ee dugsiga ku yeeshay cunuggaaga iyo qoyskaaga
- Wax kasta oo kale oo la khushuucday ka jeclaysatayna qalbigaaga in aad tidhaa

Taageeradaada iyo kaqeybgalkaagu waxay qiimo u leeyihiin howsha dib u cusboonaysiinta. Waxaan u baahanahay waraaqo iyo fiidiyowyo badan intii suurtagal ah marka lagu daro dariiqooyinka kale ee aad ku taageeri karto! Fadlan u dir dhamaan waraaqaha iyo fiidiyeyaasha ajackson@upeducationnetwork.org.

Mahadsanid!